Somaliska
Fler och växande företag

Korniinka iyo tirade shirkadaha dalka oo sare u kacay

17ka sebteembar oo ku aadan maalinta doorashada, waxaa go'aan laga gaari doona mustaqbilka dalka Iswiidan, xilkaasuna wuxuu saaran yahay adiga iyo aniga ba. Dhammaanteenna waxaa dusha naga saaran isla xilkaas. Codkaaga iyo kayga waa isku qiimmo. Haddaba miyaan kor u qaadna horumarka heerka sare ah, mise hoos ayaan u dhigna, anagoo karoonka shanaad ee canshuurta ka saarno khasnadda aanu wadajirka u leenahay? Miyaan horumarinaa hab-noleedka dalka Iswiidan – mise dusha ayaan u dhignaa?

leh awood waxbarashada, awooda tartan, ummadeeda-na dhammaantood isku filan – waa habka aan ku doonayno in an shaqada ku kordhinno. Waa hab tobbankii sano ee ugu danbeeyay u dalka Iswiidan ku helay horumar iyo heerarka korsaarka ee hooseeyaa. Tobbankii sano ee ugu danbeeyay waxaa la abuuray shaqo cusub oo tiradooda gaareeyso 300 000. Waa hagaag, laakinse naguma filna.

Waa in la kordhiyaa waxbarashada iyo cilmibaarista
Haddii aanu nahay xisbiga socialdemokratiga, waxaanu doonayna in dalkayga Iswiidan uu sididii berri hore ugu qaybgalo tartanka aqoonta iyo karti-xirfadeed – taaso aanan lagu fulin karin iyadoo mushaharrada hoos loo dhigo iyo shaqo aanan laysku hubin. Dalka Iswiidan waa dalka adduunka ugu firfircoon haddii ay noqoto maalgelinta cilmi-baarista iyo horumarinta. Imminka waxaan hirgelin doona in boqolkiiba hal ee waddartaguud ee soo-saarka qaranka "BNP", lagu maalgeliyo cilmi-baarista, taaso laga bixiyo khasnadda an wadajirka uu leenahay. Maalgelinta cilmi-baarista

Haddii aad u baahan tahay warbixin dheeraad ah mise aad dooneeyso inaad xubin ka noqoto xisbig aocialdemokratiga, booqo hoyga Internetka ee socialdemokratigana.se mise wac taleefanka 08-700 27 27

waxaan ku kordhin doona lacag dhan 2,3 biljan oo karoon ah, boosaska jaamacadaha dalka waxaan ku kordhin doona 17 500 boosas, cilmi-baaristana ee shirkadaha yaryar waxaan ku maalgelin doona 900 maljun oo karoon. Sida sare an ugu qaadno heerka tayada iyo sidii dhammaan ardayda ay ku gaari lahaayeen ujeedada waxbarashada, waxaa dugsiyada dhammaantood la siiyaya lacag lagu qorto macallimiin iyo qabiiro kale, kuwaaso tiradooda gaareeyso 15 000 qof. Dugsiyada sare ee lagu barto gogoldhigga xirfadaha waa la sii horumarin doona, iyado tusaale ahaan boosas waxbarasho casri ah goobaha shaqada.

Korniinka awooda tartanka ee ganacsiga
Labatankii sano ee ugu danbeeyay tiradan sida sidaan oo kale looma aasaasin shirkado. Waa horumar fiican, waxaana ku dadaali doona in an sii sahlinno noqoshada ganacsadeha, ahaanshada ganacsade iyo ahaanshada ganacsade ganacsigiisa ku guuleysatay.

Shirkadaha yaryar
Shirkadaha yaryar waa in ay dareemaan badbaadin. Sidaas awgeed, waxaan doonayna in an sii wanaajinno xaaladaha shirkadaha yaryar oo baahan kaalmada bulshada, sida markii ganacsadeha u xannuunsan yahay. Sidaa an ugu sahlinno ganacsadeha yaryar waxaan maalgelin doona talosiinta dhammaan goobaha dalka, iyo sidii an 300 tilaabo hoos ugu dhigi lahayn maamulka. Shiradaha yaryar ee ka jira dhammaan gobollada dalka waa in ay helaan hanti fiican ay ku koraan oona siiso awood ay dad ku qortaan. Labo biljan karoon maalgelinta caymiska maalgelinta ku naasiibsashada.

Waxaan kalo hirgelin doona canshuur dhimid gaar ah, gaar ahaan loogu talaggalay baahida shirkadaha yaryar: canshuurta haddiyada iyo dhaxalka oo la ciribtiro, canshuurta gaarka u ah ganacsadeha oo hoos loo dhigo haddii u qorto shaqalaha ugu horreeyo, iyo shirkadha aanan sidaas u waynayn oo canshuurtooda laga dhimi doono lacga dhan hal biljan.

Iyadoo hal biljan karoon lagu maalgeliyo korniinka awoodda tartanka dhaqaalaha ee laamaha ganacsiga qaarkood, kuwaaso gaar ahaan muhim u ah dhaqaalaha dalka Iswiidan, waxaan horumarinayna xooga dhaqaaleed ee dalka Iswiidan. Balajiin ayaa lagu maalgelin doona warshadaha dayuuradaha, dayaxgacmeedka, geedaha, kaynka, birta, baabuurada, kombyuutarada iyo is-gaarsiinta, iyo warshadaha daawooyinka farsmada aqoonta dabiiciga. Tusaale ahaan waxaan wadajir u maalgelin doona anaga iyo warshadaha baabuurada sidii loo saari lahaa baabuuro deegaanka u roon.

Dhisida dalka Iswiidan wuxuu ku salaysan tahay daacadnimo iyo ku sugnaanshada reyreynka dhaqaalaha
Ummadda ku sugan reynreyn dhaqaaleed waxay awoodan dhiirrigelin iyo xil-qaadasho. Ku sugnaanshada reyreynka dhaqaalaha waxay xoojisaa awoodayda an ugu qaybgeli lahayn oona gacan ka geeysan lahayn markii

adduunka u wax iska beddelo. Wuxuu keena korniinka horumarka dhaqaalaha, wuxuuna abuura shaqo. Isla sidaaso kale waxaa muhim ah daacadnimada loo muujiyo adduunweynaha iyo arrimaha cusub. Isku darka ku sugnaanshada reyreynka dhaqaalaha iyo daacadnimada ayaa dalka Iswiidan tobbankii sano ee ugu danbeeyay u suurtageliyay in dalkayga u noqdo dalka ugu gacansareeyo tartanka dhaqaalaha ee adduunweynaha. Haddii aanu nahay xisbiga socialdemokratiga waxaanu doonayna in annu ka weecan siyaasadaas horumarka leh.

Wax ku bediladeeda – Dalka Iswiidan oo awoodda dhaqaalahiisa hoos u dhaca
Haddii aanu nahay xisbiga socialdemokratiga waxaanu doonayna in annu ka weecan siyaasadaas horumarka leh, iyadoo an maalgelinno waxbarashada, awoodda tartanka dhaqaalaha iyo ummad ku sugnan reyreyn dhaqaaleed. Sidaas ayaan ku suurtagelin doona horumarka dhaqaalaha iyo shaqooyin tiro badan dalka Iswiidan.

Isbahaysiga midigta ee xisbiga moderaterna u hogaamiyo, wuxuu doonayaa in u ku dhaqaaqo siyaad siyaasadayda boqolkiiba ka duwan. Waxay doonayaan in ay ciribtiraan habka horumarka ee dalka Iswiidan. Waxay doonayaan in canshuurta ay ka jaran dadka ugu dhaqaale fiican, hoos u dhigan xaalada wanaagsan ee suuqa shaqada, hoos u dhigan heerka magdhowga ee shaqolaaweyada iyo caymiska bukaanada. Siyaasada isbahaysiga midigta ee xisbiga moderaterna u hogaamiyo ma suurtagelin doonto horumarka dhaqaalaha. Waxay abuuri doonan kala fognaanashada ummadda isku duban iyo dal dib u dhac dhaqaaleed ku sugan.

Dalka Iswiidan anagu aanu maamuli doono waa loo dhan yahay, adigu-se dalkee dooratay?